

# <sup>1</sup>Xogta kooban ee Luuqada Fudud Ku qoran ee Xeerka Caawimaada Dhaqaalaha



## **Dulmarka**

Boston Children's Hospital (BCH) wuxuu u taagan yahay u adeegida dhammaan bukaannada, ayna ku jiraan kuwa aan lahayn caymiska caafimaadka iyo kuwa aan dhiibi karin dhammaan ama qayb kamid ah qarashka daryeelka aasaasiga ah ee ay heleen. Barnaamijka Caawimaada Dhaqaalaha ee Boston Children's Hospital ayaa siiya caawimaad dhaqaale bukaannada u qalma ee u baahan in laga caawiyo bixinta qarashka daryeelka degdega ah ama caafimaad ahaan muhiim ah ee ay ka helaan xarunta Boston Children's Hospital.

## **Helitanaka Caawimaad dhaqaale**

Waxaad awoodi kartaa inaad hesho caawimaad dhaqaale haddii aadan haysan caymis, caymiskaagu kugu filnayn, ama ay kugu adkaanayso dhaqaale ahaan inaad dhiibto si buuxda qarashaadka lagaa rabo inaad jeebkaaga ka dhiibto ee BCH. Fadlan ogoow inay jiraan arimo gaar ah oo ka reeban adeegga kuwaasoo aan caadiyan u qalmin caawimaad dhaqaale.

## **Sida loo Codsado Caawimaad Dhaqaale**

BCH, asagoo adeegsanaaya la taliyaashiisa dhaqaalaha, wuxuu ka caawinayaa bukaannada/wakiilada nidaamka codsashada caawimaada Dhaqaalaha. La taliyaashiisa Dhaqaalahu waxay ka caawinayaan bukaannada/dadka qarashka bukaanka sinaaya BCH iyo Haayadaha codsiga barnaamijyada caawimaada dhaqaalaha ee dawlada ama BCH, sida Medicaid, MassHealth, Commonwealth Care iyo Health Safety Net. Dadka doonaya caawimaada dhaqaalaha waxaa laga codsan doonaa inay buuxiyaan Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha ayna keenaan dukumiintiyada taageeraaya si loo cadeeyo.

## **Shuruudaha Uqalmida**

Caawimaada dhaqaalaha waxaa caadiyan lagu go'aanshaa qaab kala hooseeya ayadoo laga eegaayo dakhliga qoyska lana raacaayo Heerka Fakhriga ee Federaalka (Federal Poverty Level, FPL). Haddii dakhligaaga iyo/ama dakhliga cidda sadexaad ee masuulka ka ah qarashka oo la iskudaray ay yihiin ama ka hooseeyso 400% heerka FPL, waxaad heli kartaa qiimayaal raqiis ah ood ku helayso daryeelka dhakhtarka. Ma jiro qof u qalma caawimaada dhaqaalaha sida ku cad Xeerka Caawimaada Dhaqaalaha ayaa laga qaadi doonaa lacag dheeraad ah daryeelka degdega ah ama caafimaad ahaan muhiimka ah si ka badan cadadka caadiyan Laga Qaado Bukaanka leh caymis daryeelkaas daboolaya. Haddii aad haysato caymis caafimaad oo kugu filan, waxaa suuragal ah inaad u qalmin caawimaad dhaqaale. Fadlan ka fiiri xeerka buuxa sharaxaada buuxda iyo faahfaahinta.

## **Meesha aad Ka helayso Xogta**

Waxaa jiro qaabab badan ood ku helayso xog ku saabsan hanaanka go'aaminta caawimaada dhaqaalaha, ama aad ka helayso nuqulada Xeerka Caawimaada Dhaqaalaha, Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha, iyo xeerka Daynta iyo Aruurinta Lacagta si bilaash ah.

---

<sup>1</sup> Siyaasadda Taakuladda Maaliyadeed ee Boston Children's Hospital ma dabakhayso Boston Children's Health Solutions, Rx, LLC d/b/a Boston Children's Pharmacy ama ashyaa kasta oo uu qaybiyey Boston Children's Pharmacy.

- Xogta oo oonleen ah kasoo dagso  
[www.childrenshospital.org/financialassistance](http://www.childrenshospital.org/financialassistance)
- Qoraal ahaan ku codso xogta boostada ama adoo tagaaya Xarunta Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka oo ku taala 300 Longwood Avenue, Boston, MA, Farley Building room 160.1 iyo 160.2.
- Codso xogta adoo wacaaya ee Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka ood ka wacayso (617)-355-7201

Xeerka Caawimaada Dhaqaalaha, Xogta Kooban ee Luuqada Fudud Ku qoran ee Caawimaada Dhaqaalaha, iyo Xeerka Daynta iyo Lacag Aruurinta ayaa lagu heli karaa luuqado badan.

©Boston Children’s Hospital, 2022 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin • **Bogga 1 ee 1 bog**